OGEYSIIS KU AADDAN DHIGEYSI DADWEYNE IYO BIXINTA ISUGEYNTA QORSHAHA GOBOLKA TENNESSEE EE 2020-2024 IYO QORSHAHA TALLAABADA SANADLAHA AH EE LOOGU TALAGALAY BARNAAMIJYADA GURYAYNTA IYO HORRUMARINTA JAALIYADDA

Waaxda Horrumarinta Guryaynta ee Tennessee (Tennessee Housing Development Agency) (THDA) waxay dhammaystirtay oo ay diyaarisay nuqul qoraal oo ah Qorshaha Iskujirka ee 2020-2024 ee Gobolka Tennessee iyo Qorshaha Tallaabada Sanadlaha ah ee 2020-2021 ee loogu talagalay guryaynta iyo horrumarinta jaaliyadda ee Tennessee. Qorsha Iskujirka ee 2020-2024 iyo Qorshaha Tallaabada Sanadlaha ee 2020-2021 waxaa la socoda oo weheliya qorshayn, codsi, iyo warbixin loo gudbinnayo barnaamijyada deeqda ee shanta barnaamijo ee deeqda ee Waaxda Guryaha iyo Horrumarinta Magaalooyinka Mareykanka [U.S. Department of housing and Urban Development] (HUD):

- Deeqda Dowladda ku Bixiso Horrumarinta Jaaliyadda (CDBG, oo ay maarayso Waaxda Dhaqaalaha iyo Horrumarinta Jaaliyadda ee TN (TN Department of Economic and Community Development)
- Barnaajka Iskaashiga Maalgelinta GURYAHA (HOME) (HOME, oo ay maarayso THDA)
- Sanduuqa Aamminaada Guryaynta (Housing Trust Fund) (HTF, oo ay maarayso THDA)
- Deeqda Xalinta Degdegga (Emergency Solutions Grant) (ESG, oo ay maarayso THDA)
- Fursaddaha Guryaynta ee loogu talagalay Shaqsiyaadka qaba Barnaamijka AIDS (HOPWA, oo ay maarayso Waaxda Caafimaadka ee TN)

Barnaamijyadan waxaa loogu talagalay in lagu taageero dhowr barnaamijyo ee dhanka guryaynta iyo dadaallada horrumarinta jaaliyadda ee ka jira gebbi ahaan gobolka Tennessee, gaar ahaanna loogu talagalay in ay ka faa'idaystaan qoysaska daqligooda dhexdhexaadka ah - iyo kuwa daqligoodu uu hooseeyo. Dowladda Gobolka waxaa looga baahan yahay in ay diyaariso oo ay waaxda HUD u gudbiso Qorshaha Iskujirka ah ee ay gudbiso shantii sannadba hal mar. Qorshahan cusub ayaa waaxda HUD loo soo gudbin doonaa kama dambays bisha Maajo 2020.

Muwaadiniinta ayaa waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dib u eegid ku sameeyaan oo ay ra'yi ka bixiyaan macluumaadka kujira warbixinta oo laga arki karo https://thda.org/about-thda/public-notice-and-comment laga bilaabo 4ta bisha Maarso, 2020. Qabyo qoraalkan oo kooban oo ku qoran af Ingiriisi iyo af Isbanish ayaa sidoo kale la heli doonaa. Faallooyinka oo qoraalka ah oo dhanka elegtaroonigga ah lagu soo gudbiyo bogga internetka THDA waxaan ogolaan doonaa laga bilaabo 4ta Maarso ilaa iyo 20ka Abriil, 2020.